

“Cod Siinta Kuwa Marar Dhif ah uun La Maqlo”

Kala noqoshada Siidaynta MSOP ee Ku meelgaarka ah Minn. Stat. § 253D.30

A. Siidaynta Ku meelgaarka ah

Dadka qaar ee daawayn lagu xukumay ayaa waxaa laga yaabaa in laga siidaayo xarunta daawaynta Barnaamijka Dembiilaha Galmada ee Minnesota (MSOP) waxa loogu yeero siidayn ku meelgaar ah. Tani waxay u ogolaanaysaa shaqsiga in la sii daayo, laakiin weli uu ku sii jiro xukunka daawaynta.

Qofka loogu xukmiyey daawaynta in inuu yahay qof halis ah galmo ahaan (SDP) ama qof qaba shakhsiyada jirrada galmo si ku meelgaar ah looma siidayn karo ilaa shaqsigu awood u leeyahay inuu sameeyo isbadal la aqbali karo oo laqabsiga bulshada ah.

- 1) Laba arrimood ayaa la tixgeliyaa marka la go'aaminayo siidaynta ku meelgaarka ah.
 - a) Haddii muddada daawaynta shakhsiga iyo xaalada maskaxeed ee hadda ku jiro qofku ay muujinayaan in aan baahi dambe loo qabin daawayn iyo kormeer lagu sameeyo habka daaweynta ee hadda jirta; iyo
 - b) Haddii shuruudaha qorshaha siidaynta ku meelgaarka ahi siinayaan heer ilaalin macquul ah dadweynaha iyada oo qofka u saamaxaysa inuu ku guulaysto bulshada dhexdeeda.
- 2) Agaasimaha fulinta, oo ay weheliyaan shaqsiga iyo dadka kale ee ku habbooni waa inay abuuraan oo ay kormeeraan qorshe siidayn kumeelgaar ah. Qorshaha waa inay uu dib u eegis ku sameeyaan ugu yaraan saddexdii biloodba mar agaasimaha fulinta iyo shaqsigu waana in warbixin ku saabsan xaalada shaqsiga iyo u hogaansanaanta qorshaha loo gudbiyo qareenka degmada xukmisay daawaynta iyo degmada mas'uuliyada dhaqaale qaadaysa.
- 3) Siidaynta ku meelgaarka ahi si toos ah uma dhammaato. Shakhsigu wuu codsan karaa isbeddelo in lagu sameeyo shuruudaha siidaynta ku meelgaarka ah oo shakhsiguna wuxuu ka codsan karaa guddiga dib u eegista gaarka ah siidayn buuxda.

B. Dib u aqbalid/soo jiifin Ikhtiyaari ah

Shakhsiga ku jira siidaynta ku meelgaarka ah ayaa wuxuu si ikhtiyaari ah ugu soo noqon karaa MSOP illaa 60 maalmood iyada oo uu oggolaansho ka haysto agaasimaha fulinta.

Haddii shaqsiga aan dib loogu soo celin siidaynta ku meel gaarka ah 60 maalmood gudahood, siidaynta ku meelgaarka ahi way burburtay Haddii ay taasi dhacdo, shakhsigu wuxuu haystaa 15 maalmood inuu kaga codsado dib u eegista ka noqoshada Guddiga Dib u eegista Gaarka ah.

Dhammaan xeerarka iyo shuruudaha siidaynta ku meelgaarka ahi way shaqaynayaan haddii shaqsiga laga siidaayo MSOP muddo 60 maalmood gudahood ah. Guddiga Dib u eegista Gaarka ahi waxay u baahanyihiin oo keliya inay dib u eegaan tan haddii uu isbeddel weyn uu ku yimaado qorshaha jira.

C. Kala noqoshada Siidaynta Ku meelgaarka ah

- 1) Agaasimaha fulinta ayaa wuxuu kala noqon karaa siidaynta ku meelgaarka sababahan mid ka mid ah darteed:
 - a) shaqsigu muuna raacin shuruudaha qorshaha siidaynta ku meel gaarka ah; ama
 - b) shaqsigu wuxuu soo muujinayaa habdhaqan halis ku ah naftiisa ama dadka kale.
- 2) Agaasimaha fulintu wuu ka noqon karaa siidaynta ku meelgaarka ah oo kadibna wuxuu amri karaa, hadal ahaan ama qoraal ahaan, shaqsiga in isla markaaba lagu celiyo xarunta daawaynta ee MSOP. Agaasimaha fulintu wuxuu haystaa 7 maalmood ka dib marka shakhsiga lagu celiyo xarunta si uu u soo saaro warbixin uu ku diiwaangelinayo sababaha uu ka noqshada u sameeyey. Warbixintu waa inay qeexdo sababaha iyo xaqiiqooyinka cayiman ee ka noqoshada lagu salaynayo. Ogaysiiska hore in shaqsiga la siiyo looma baahna.
- 3) Nuqulka warbixinta ka noqoshada waa in la siiyo shakhsiga, qareenka shakhsiga, qareenka degmada fulinaysa xukminta daawaynta, iyo degmada qaadaysa mas'uuliyada dhaqaale.
- 4) Shakhsiga lagala noqday siidaynta ku meel gaarka ah waa inuu ku guulaysto dib uga codsashada guddiga dib u eegista gaarka ah iyo guddiga racfaanka garsoorka ka hor inta uusan ku laaban xaaladda siidaynta ku meelgaarka ah.

D. Racfaanka ka noqoshada

Shaqsi kasta oo lagala noqday siidaynta ku meelgaarka ah, ama qof kasta oo danaynaya, ayaa wuxuu ka codsan karaa guddiga dib u eegista gaarka ah in ay dib u eegis ku sameeyaan ka noqoshada. Codsiga waa in lagu xareeyo 7 maalmood gudahood, oo aysan ku jirin Sabtida, Axadaha iyo feestooyinka sharciga ah. Dhagaysiga waa in ballantiisa la qabto 30 maalmood gudahood.

Marka la joogo dhagaysiga, Guddiga Dib u Eegista Gaarka ah ayaa waxay talo u soo jeediyaan Gudiga Rafcaanka Garsoorka haddii kala noqoshadu ay tahay in la taageero iyo in kale. Guddiga dib u eegista gaarka ah ayaa waxay sidoo kale ku talin karaan siidaynta ku meelgaarka ah oo cusub.

Bayaanka ADA: Haddii aad naafonimo leedahay oo aad rabto ogaysiiskan oo qaab kale ah waxaad ka dalban kartaa degmada ama haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan habka xukminta daawaynta, la xiriiir Xafiiska sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka, 121 7th Place E., Suite 420 Metro Square Bldg, St. Paul, Minnesota 55101, <https://mn.gov/omhdd/> Cod: 651-757-1800 ama Khadka Bilaashka ah: 1-800-657-3506.